

10kii sano ee la soo dhaafay waxaa shaqaalaha mushaarkooda laga xaday **\$200 malyan.**

Dawladdu waxay ku fashilantay in ay shaqaalaha dib ugu soo celiso **\$80 malyan.**

Maxay dawladda Ontario u qaadi wayday tallaabo ay nagu difaacdo?

Maxay tahay tuuganimada mushaarka?

Tuuganimada mushaarka waxay dhacdaa markii shirkadaha ay diidaan bixinta saacadaha la shaqeeyay mushaarkooda. Waxay dhacdaa markay bixin waayaan saacadaha dheeriga ah, fasaxyada guud, shaqaalaha fasaxooda ama lacagta ruqsada. Shaqaalaha waxay luminayaan kumanaan doollar. Shaqaalaha waxaa khasab ku noqoneysa in ay kala doortaan bixinta ijaarka guryaha ama quudinta qoyska sare u kaca noloshu awgeed.

Haddana dawladdu waxay culeys saareysaa shaqaalaha in ay u dagaalamaan mushaarkooda. Tani waa khatar weyn marka shirkadaha sabab la'aan ay dadka u ruqseeyaan.

Annagu yaa nahay?

Workers' Action Centre waa urur ay ku bahoobeen bulsho kala duwan oo u dagaalamaya hagaajinta noloshu iyo xaaladaha shaqaalaha Ontario.

Waxaa hogaamiya shaqaalaha haysta shaqooyinka hoose ee lacata yar kuwaasoo u dagaalamaya in caddaalad iyo hufnaan loo siman yahay laga helo goobaha shaqada.

Ololaha caddaaladda shaqaalaha (**Justice for Workers**) waa mid saldhig u ah u dagaalanka shaqo hufan. Taasoo macnaha u yahay in is baddal lagu sameeyo shuruucda si dhammaan loo helo mushaar caddaalad ah, bixinta maalmaha xanuunka iyo dadka oo dhan in ay siman yihiin.

Ku soo biir dagaalka!



workersactioncentre.org/wage-theft



JOOJI XATOYADA MUSHAARKA



Madaxdeennu waxay xadaan mushaarkeenna.

Dawladdenana tallaabo kama qaaddo.

Waa waqtigii la joojin lahaa.

Sharciga Ontario... MA AHA MID DAAFACAYA SHAQAALAHA

Shirkaduhu waxay isticmaalayaan dul duleellada sharciga si ay u xadaan mushaarka shaqaalaha

Dul duleellada sharciga shaqaalaha awgiis, shirkaduhu waxay si khaldan noogu tilmaamaan sahaqaale iskood u shaqeysta ama qandaraasle si ay uga macaashaan iyo in ay ku xad gudbaan xuquuqda shaqaalaha ee sharciga Ontario.

Daciifnimada sharciga awgiis, shirkaduhu waxay isticmaalaan qandaraasle hoose, wakaalado ku meel gaar ah iyo ganacsi si ay uga cudur daartaan tuuganimada mushaarka. Tani ma aha caddaalad.




Codsigeenna ku saabsan joojinta Tuuganimada Mushaarka

DHAQAN GELINTA SHARCIYADA

- Dawladdu waa in ay baaris ku sameysaa goobaha shaqada – si aysan loo sugin cabashada shaqaalaha.
- In la ciqaabo shirkad kasta oo ku kacda tuuganimada mushaarka
- Shaqaalaha waa in ay helaan abaal marin la xiriirta dhibaataada ay la kulmaan isla markaana la siiyo dul saarka mushaarkii laga xaday.
- Shirkaduhu waa in ay dib u bixiyaan mushaarkii ay xadeen. Iyadoo macnahu uu yahay tallaabooyinka dib u ururinta, ka qaadidda laysanka ganacsiga iyo xoojinta amaanka ee shirkadaha sharciga ku xadguba marar badan.

HA LA HAGAAJIYO SHARCIYADA

- Ka hortagga kala saaridda qaldan si shaqaalaha loogu aqoonsado in ay yihiin shaqaalaha shirkadda u shaqeeya haddii aan la helin caddeyn rasmi ah.
- Qandaraaslayaasha in ay masuul yihiin si shirkadaha waaweyn aysan uga mar marsiyoonin xatooyada mushaarka.



AWOODDA RUNTA AH IYO DIFAACA SHAQADA

- Shirkaduhu awood uma laha in ay ruqseeyaan shaqaalaha haddii aysan jirin sabab macquul ah.
- Difaaca ficillada sida wadajirka ah loogu dhaqaaqo: xaquuqda falalka sida wadajirka ah loo qaado si loo helo shuruudo hufan ee shaqada ayadoo aan laga baqin ruqso.
- Shaqaalaha waa in ay haystaan shaqadooda ilaa iyo inta ay barista socoto si looga hortago ruqso ama aar goosasho.